# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILADA

# XEERKA TAKAALIIFTA HORUMARINTA WADOOYINKA

## (Xeer L/r.64/2013)

REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XERM/249-2048/092013 DATE 24/09/13

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0359/092013

## Dhaqan-galka Xeerka Takaaliifta Horumarinta Waddooyinka Xeer Lr. 64/2013

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada JSL, Go'aan Lr. GW/G/KF-22/620/2013 ee ku taariikhaysan 24/09/2013 ee ay ku ansixiyeen Xeerka Takaaliifta Horumarinta Waddooyinka Xeer Lr. 64/2013.

Wuxuu Soo Saaray

Dhaqan-galka Xeerka Takaaliifta Horumarinta Waddooyinka Xeer Lr. 64/2013 ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**The Republic of Somaliland**
**House of Representatives**
**Head Quarter Hargeisa.**

**Jamhuuriyadda Somaliland**
**Golaha Wakiilada**
**Xarunta Hargeysa.**

Ref: GW/G/KF-22/620/2013 Date: 24/09/2013

**Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Xeerka Takaaliifta Horumarinta Waddooyinka**
**Xeer Lr.64/2013**

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

**Markuu Arkey:-** Qodobka 14aad Farqadiisa 1aad, 38aad, 39aad iyo 54aad Farqadiisa 1aad ee dastuurka Qaranka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu Arkay:-** In Waddooyinku ka mid yihiin hal-bawlaha isku xidha dalka, isu-gudubka bulshada, sugidda amaanka iyo kor u-qaadida dhaqaalaha.

**Markuu Arkay:-** In Dhaqaalaha waddooyinka ka soo gala **Fuel Levy-ga iyo Lessen Levy-ga** iyo dhibaatooyinka waddooyinku aanay ahayn wax is-kafayn kara, isla markaana aanay jirin wax dhaqaale ah oo inaga soo galay qaadhaan-bixiyayaasha laga soo bilaabo sanadkii 2006.

**Markuu Dersay:-** Dhibaatooyinka ay shilalka gaadiidku keenaan waddo xumadda awgeed ee dhimashada Dadka, xoolaha iyo khasaaraha dhismayaasha iyo hantida kale ee kala duwan.

**Markuu u Codeeyey:-** Xeerka Takaaliifta Horumarinta Waddooyinka **Xeer Lr. 64/2013 Kal-fadhigii 22aad fadhigiisii 24aad** taariikhduna ku suntanayd **24/09/2013** oo ay goob joog ahaayeen **(70)** Mudane oo ka mid ah Mudanaayasha Golaha Wakiiada.

## WUXUU

Cod aqlabiyadd ah oo konton iyo siddeed **(58 cod) mudane** oo gacan taag ah ku Ansixiyay **Xeerka** Takaaliifta Horumarinta Waddooyinka **Xeer Lr. 64/2013**, halka **siddeed (8) mudane** ka diiden, saddex (3) mudane ka aamuseen **Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caaddada ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

| | |
|---|---|
| **C/risaaq Siciid Ayaanle** | **C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)** |
| Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL | Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL |

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADA SOMALILAND

# Golaha Wakiilad JSL.

**Markuu Arkey:-** Qodobka 14aad Farqadiisa 1aad, 38aad, 39aad iyo 54aad Farqadiisa 1aad ee dastuurka Qaranka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu Arkay:-** In Waddooyinku ka mid yihiin hal-bawlaha isku xidha dalka, isu-gudubka bulshada, sugidda amaanka iyo kor u-qaadida dhaqaalaha.

**Markuu Arkay:-** In Dhaqaalaha waddooyinka ka soo gala **Fuel Levy-ga iyo Lessen Levy-ga** iyo dhibaatooyinka waddooyinku aanay ahayn wax is-kafayn kara, isla markaana aanay jirin wax dhaqaale ah oo inaga soo galay qaadhaan-bixiyayaasha laga soo bilaabo sanadkii 2006.

**Markuu Dersay:-** Dhibaatooyinka ay shilalka gaadiidku keenaan waddo xumadda awgeed ee dhimashada Dadka, xoolaha iyo khasaaraha dhismayaasha iyo hantida kale ee kala duwan.

## Waxa uu ansixiyey Xeerka Takaaliifta Horumarinta Waddoyinka.

## Qodobka 1aad
## Eray Bixin

Hadaan Xeerka gudihiisa si kale loogu xusin ama loogu sheegin waxaa loola jeeda erayadan soo socda:-

**Wajibaad Maaliyadeed**:- Waxaa loola jeeda takaaliifta Xeerkani jideeyey.

**Xoolaha Damaanka ah**:- Waxaa loola jeedaa xoolaha ganacsi ahaan looga dhoofinayo dekedaha Somaliland.

**Gaadiid:-** Waxaa loola jeeda gaadiidka kala nooca ah ee wadooyinka mara ee xeerkan lagu xusay.

**Gaadiidka yar-yar:-** Waxa loola jeeda noocyada gadiidka qaadkoodu ka yaryahay 3 tan sida Cars, Pick-up & Land cruisers, Mini-Bus , Light goods vehicle.

**Gaadiidka Waaweyn:-** Waxa loola jeeda gadiidka qaadkoogu ka badan yahay **3 Tan** oo ah: medium goods vehicle, heavy goods vehicle , trailers,

**Tan:-** waa halbeeg qiyaseed culays oo u dhigma **1000Kg**

**Cashuur (Tax):-** kalmada Cashuur (TAX) Waxaa loola jeedaa takaaliifta ama Cashuurta lagu jideeyay the body of law on direct taxation.

## Qodobka 2aad
## Magaca Xeerka

Magaca Xeerkani Waa “ **Xeerka Takaaliifta Horumarinta Waddooyinka.**

## Qodobka 3aad
## Ujeedada Xeerka

Ujeedada xeerkan laga leeyahey waa;

**1-** In la abaabulo dakhli lagu dayactiro wadooyinka laamiyda ah ee jira iyo in lagu dhiso wadooyin cusub oo halbawle ama laf dhabar u ah horumarka iyo isu socodka gobolada dalka.

**2-** In ka qeyb qaato isu socodka bulshada, sugidda amaanka & koboca dhaqaalaha dalka.

**3-** Iyo Inu abuuro shaqooyin ay ka fa'ideystaan qoysas aan shaqeyn oo reer Somaliland ahi.

## Qodobka 4aad
## Xadka Dabaqaada

Xeerkan waxaa lagu dabaqayaa xoolaha damaanka iyo gadiidka ku xusan **Qodobka 1aad**

## Qodobka 5aad
## Waajibaadka Maaliyadeed ee Xoolaha Damaanka ah

Waxaa la waajibiyey in neef kasta oo ka dhoofaya dekadaha dalka laga bixiyo qadarka lacagta ah ee soo socota:

1- Adhiga:- Neefkiiba 3500.00SL.SH (saddex kun iyo shan Boqol oo Sl.Sh. ah).
2- Lo'da: Neefkiiba 14000.00 SL.SH. (afar iyo toban kun oo Sl.sh. ah).
3- Geela: Neefkiiba 14000.00 SL.SH. (afar iyo toban kun oo Sl.sh. ah).

## Qodobka 6aad
## Waajibaadka Maaaliyadeed ee Gadiidka

1. Waxaa la waajibiyey in gaadiidka yar-yar-Bixiyaan 80.000 SL.SH ***(Siddeetan kun oo Sl. Shs ah)*** lixdii biloodba hal mar.

2. Gaadiidka Waaweyn:Bixiyaan 300,000 Sl.Sh**. *(Saddex Boqol oo kun oo Sl. Shs ah )*** Lixdii bilood hal mar laga qaado.

## Qodobka 7aad
## Cashuurta

Cashuurta Xeerkani jideedayey waxay galeysaa miisaaniyad sanadeedka Qaranka, waxaana ururinteeda loo raacayaa chapter I & II ee title IV ee Xeerka the body of law on direct taxation iyo Xeerarka kale ee khuseeya Maaliyada.

## Qodobka 8aad
## Dacwadaha iyo Ciqaabta

Iyada oo habka dacwad qaadista loo raacayo xeerarka habka madaniga iyo ciqaabta, ciqaabaha lagu mutaysan karo jabinta Xeerka waxaa loo raacayaa ciqaabaha ku xusan, Title III ee **The body of laws on Direct Taxation**. Qof

kasta oo jabiya qodobada xeerka waxaa lagu ciqaabaya, ciqaabaha ku xusan: **Title V**, ee Xeerka **The body of laws on Direct Taxation** iyo Xeerarka kale ee khuseeya.

## Qodobka 9aad
## Awoodaha Hantidhawrka

Ka sakow awoodaha hantidhawraha guud ee ku xusan xeerka Hantidhawraha Guud, xeer **lambar 05/98** iyo xeerarka kale ee dalka, hantidhawraha guud wuxuu awood u leeyahay; baadhista iyo dabagalka waajibaadka maaliyadeed ee xeerkani jideeyey.

## Qodobka 10aad
## Hayada Wadooyinka Somaliland ( SRA)

Mashruuc sharci ee lagu assaasayo Ha'yadda Madaxa banana ee Wadooyinka Somaliland (Somaliland Road Authority), xukuumadu waa iney ku keento shan iyo toban bilood gudahood.

## Qodobka 11aad
## Dib-u-eegista Xeerka

Lix bilood ka dib marka uu Madaxweynahu saxeexo Xeerkan, waxa Golaha Wakiiladu Jamhuuriyada Somaliland dib u eegis ku sameyn doonaan takaaliifta uu jideeyay Xeerkani.

## Qadobka 12aad
## Dhaqan-Galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka Golaha Wakiiladu ansixiyo, Madaxweynuhuna saxeexo isla markaana laguna baahiyo faafinta rasmiga ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL

C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL